## GURMADKA XANUUNADA DILAACA ●
Waxay baaritaan iyo gurmad kasamaysaa xanuunada dilaaca si looga hortago xanuunka loona difaaco bulshada.
**Taleefanka:** 614-645-6578
**Saacadaha:** 8 a.m.-5 p.m., Isniinta-Jamcada

## QORSHAYNTA IYO HORMARINTA TAYADA ● ☰
Waxay iskuxirtaa qorshaynta hormarinta caafimaadka bulshada iyo qorshaynta xeeladaysan ee Caafimadka Dadwaynaha Columbus; waxay qiimaysaa kalsoonida macmiilka; waxay hagtaa barnaamijyada hormarinta tayada; waxayna kormeer kusamaysaa dadaalka iyo buuxinta heerarka caafimaad ee waxda, gobalka, iyo heer qaranba.
**Taleefanka:** 614-645-6052
**Saacadaha:** 8 a.m.-5 p.m., Isniinta-Jamcada

## DARYEELKA CAAFIMAADKA EE PRIMARYONE ▲ ○ ■
Wuxuu daryeelada aasaasiga ah, OB, kan caruurta, aragga iyo ilkaha siiyaa dhamaan xubnaha bulshada. Wac si aad uhesho macluumaad dheeri ah ama aad balan uqabsato.
**Taleefanka:** 614-645-5500
**Webseetka:** www.primaryonehealth.org

## ARIMAHA BULSHADA IYO ISGAARSIINTA ● ☰
Waxay qabataa shaqada iskuxirka iyo siyaasada caafimaadka bulshada; waxay macluumaad kasiisaa bulshada caafimaadka iyo adeegyada; waxay iskuxirtaa codsiyada diiwaanada bulshada; waxayna, abuurtaa ololayaasha wacyi galinta bulshada.
**Taleefanka:** 614-645-6928
**Saacadaha:** 7:30 a.m.-4:30 p.m., Isniinta-Jamcada

## BARNAAMIJKA RYAN WHITE ○ ■ ● ▲ ♥
Waxay xanaanaysaa ayna kuxirtaa dadka qaba xanuunka HIV/AIDS ka xarumaha daryeelka, ayna kujiraan: goobaha caafimaadka, xarumaha caafimaadka dhimirka, adeegyada aalkolada iyo daroogooyinka, caawimaada hoyga iyo alaabta guriga. Waxay u adeegtaa degmooyinka Franklin, Licking, Delaware, Morrow, Union, Madison, Pickaway iyo Fairfield.
**Taleefanka:** 614-645-DARYEELKA (2273)
**Saacadaha:** 8 a.m.-4:30 p.m., Isniinta-Jamcada

## BULSHOOYIN CAAFIMAAD QABA ○ ●
Waxay hormarisaa amaanka wadooyinka ayadoo adeegsanaysa iskaashiga bulshada oo diirada lagu saaraayo isticmaalka suumanka amaanka ee gaariga, qamri cabida iyo gaari wadida, xawaaraha gawaarida, dadka duqyaasha ah ee gaariyaasha wada iyo amaanka mootooyinka.
**Taleefanka:** 614-645-1667
**Saacadaha:** 8 a.m.-4:30 p.m., Isniinta-Jamcada

## CAAFIMAADKA GALMADA ○ ■
Waxay bixisaa wacyi galin, baaritaano qarsoodi ah iyo daawayn ku aadan Infakshanada Galmada Layskugu gudbiyo (STIs) uuna kujiro HIV/AIDS, iyo baaritaano iyo ugudbinta adeegyada bulshada qofkasta oo da'diisu tahay 13 sano iyo kasii badan (ogolaanshaha waalidka looma baahna). Wax balan ah in ladhigo looma baahna. Bukaanada waxaa lagu qaabilaa siday usoo kalahormaraan.
**Taleefanka:** 614-645-7772
**Saacadaha:** 8 a.m.-2:15 p.m., Isniinta
10 a.m.-6:15 p.m., Talaadada
8 a.m.-11:15 a.m., Arbacada
8 a.m.-4:15 p.m., Khamiista/Jamcada

*Xarunta caafimaadka waxay joojin kartaa qaabilaada dadka hadii ay buuxsanto goor hore.*
*Xarumo kale oo HIV lagu baaro ayaa bulshada laga dhexsameeyaa. Saacadaha shaqada way kakaduwanyihiin. Wac adeegga si aad uhesho goobaha iyo waqtiyada adeegyada lafulinaayo.*

## GURYAHA OON SIGAAR LAGU DHEX CABIN ■
Waxay baaritaan kusamaysaa cabashooyinka ayna fulisaa go'aanada kasoo baxa sharciga Kamanuucaaya Sigaarka Goobaha Shaqada ee Gobalka Ohio.
**Taleefanka:** 866-559-OHIO (soogudbinta cabashada)
614-645-7005 (macluumaadka guud ee barnaamijka)
**Saacadaha:** 7:45 a.m.-4:45 p.m., Isniinta/Talaadada/Khamiista/Jamcada
10 a.m.-4:45 p.m., Arbacada

## DARYEELKA CAAFIMAADKA XUBNAHA TARANKA ○ ■
Waxay bixisaa adeegyo lacag la'aan ah oo lagu fulinaayo baaritaanka HIV, jamtada, isnidaamiska iyo isfiilatada. Tarunta bixisa kaliya baaritaanka caafimaadka -- wax daawo ah laguma sameeyo. Natiijooyinka baaritaanka HIV isla maalinta labaaro ayaa lasheegaa ayadoo la adeegsanayo baaritaanka degdega ah ee 10 daqiiqo. Adeegyada bukaan socodka ayaa diyaar ah.
**Taleefanka:** 614-645-6732
**Saacadaha:** 5-8 p.m., Isniinta/Khamiista
1-5 p.m., Arbacada

## TOBACCO 21 ■
Waxay shatiyo siisaa, wacyi galin iyo kormeerna kusamaysaa xarumaha Tbaakada Tafaariiqda ah Gada, iyo sido kale xarumaha Tubaakada sida Kumeelgaarka u iibsha iyo Kuwa Macaamiisha Ukeena Tubaakada, si loowaafajio Xeerka Magaalada Columbus iyo shuruucda Caafimaadka ee Magaalada Columbus.
**Taleefanka:** 614-645-7005
**Saacadaha:** 7:45 a.m.-4:45 p.m., Isniinta/Talaadada/Khamiista/Jamcada
10 a.m.-4:45 p.m., Arbacada

## NOLOL CAAFIMAAD QABTA OO TUBAAKO KACAAGAN ▲ ○ ●
Waxay hormuud utahay adeegyada abuurida iyo bixinta jihaynta shaqada xakamaynta tubaakada iyo sigaarka ee waaxdu fuliso, iyo iskaashatada bulshada iyo dadka hormuudka u ah deegaanka. Waxay abuurtaa barnaamijyo Firfircoon o nolosha ah kuwaasoo laxariira cunto caafimaad qabta iyo/ama nashadaadka jirka.
**Taleefanka:** 614-645-4798
**Saacadaha:** 8:30 a.m.-5:30 p.m., Isniinta-Jamcada

## BARNAAMIJKA QAAXADA ▲ ○ ■
Wuxuu bixiyaa baaritaan, daawayn, maaraynta kiiska, wacyi galin iyo tilmaan bixn lasiiyo dadka degan Columbus iyo Degmada Franklin ee qaba Qaaxada kacsan (TB); waxuu aqoonsadaa uuna baaraa dadka laxariira shaqsiyaadka TB da qaba; wuxuna, qiimeeyaa baahiyaha daawaynta ee dadka cusub ee soogalootiga qaxootiga ah. Adeegyada balanta lagu bixiyo.
**Taleefanka:** 614-645-2199 (qabso balan)
614-645-1823 (soosheeg xaalad taagan oo TB ah)
614-645-3209 (macluumaadka ama waxbarashada bulshada ama adeeg bixiyaha)
**Saacadaha:** 8 a.m.-2 p.m., Isnita
10 a.m.-6 p.m., Talaadada
8 a.m.-11:15 a.m., Arbacada
8 a.m.-4 p.m., Khamiista/Jamcada

## VECTOR CONTROL (XAKAMAYNTA DABINKA) ○ ●
Waxay kormeertaa ayna xakamaysaa kaneecada iyo jiirka si loga hortago xanuunada; waxay kormeertaa baraagaha dabaasha ee gaarka looleeyahay si loga hortago in kaneecada ku taranto; waxayna, talobixin kasamaysaa xakamaynta cayayaanka.
**Taleefanka:** 614-645-3111 (24-saac layn shidan) ama 614-645-7005
**Saacadaha:** 7:45 a.m.-4:45 p.m., Isniinta/Talaadada/Khamiista/Jamcada
10 a.m.-4:45 p.m., Arbacada

## DIFAACA BIYAHA ■
Waxay shatiyaysaa ayna duljoogtaysaa barkadaha dabaasha ee dad waynaha, daawooyinka, rushaynta beeraha, ceelasha biyaha ee gaarka loleeyahay, nidaamyada wasaqda kaqaada guriga iyo kuwa qayb ahaan bulshada udhaxeeya (ganacsiga yaryar) iyo xarumaha qashinka si loogu dhaqmo shuruucda Ohio; iyo, iyo tababarada maamulayaasha barkadaha dabaasha.
**Taleefanka:** 614-645-7005
**Saacadaha:** 7:45 a.m.-4:45 p.m., Isniinta/Talaadada/Khamiista/Jamcada
10 a.m.-4:45 p.m., Arbacada

## WIC (Barnaamijka Haweenka, Ilmaha iyo Dhalaanka) ▲ ♥ ■
Wuxuu siiyaa cuntooyin caawimaad ah, taageerada naas nuujinta iyo waxbarashada nafaqooyinka oo lasiiyo haweenka uurka leh, naasnuujinta iyo daawaynta niyad jabka ee haweenka, dhalaanka iyo caruurta da'doodu tahay ilaa 5 sano. Wac si aad balan uqabsato.
**Taleefanka:** 614-645-7280
**Saacadaha:** 7:30 a.m.-5 p.m., Isnita/Arbacada/Khamiista
*(waa laxiraa saacadaha 12:30-1 p.m.)*
9 a.m.-7 p.m., Talaadada *(waxaa laxiraa sacadaha 2-3 p.m.)*
7:30-11:30 a.m., Jamcada

## XARUNTA CAAFIMAADKA IYO FAYADHAWRKA HAWEENKA ♥ ○ ■
Wuxuu siisaa daryeelka qarsoodiga ah ee qorshaynta dhalmada oo lasiiyo Haweenka, xaasaskooda iyo dhalinta yaryar; waxay siisaa baaritaan, daawayn iyo wacyi galin laxariirta kahortaga cudurada galmada laysku qaadsiiyo; baaritaanada sanadlaha ah ee haweenka looga baaro xanuunada iyo kaansarada, adeegyada joojinta dhalmada ayna kujiraan qaababka mudada dheer shaqeeya (cinjirka iyo IUD), qorshaynta dhalmada intaad nooshahay, barnaamijka miisaanka jirka ee caafimaadka qaba, baaritaanka uurka, iyo joojinta isticmaalka tubaakada. Balamaha iyo booqashooyinka bukaan socodka. Waxay aqbashaa in qarashaadka lagu baxsho caymis ahaan ama lacag ahaan.
**Taleefanka:** 614-645-1850
614-645-5907 (laynka balamaha ee afka Isbaanishka lagu hadlo)
**Saacadaha:** 8 a.m.-2:15 p.m., Isniinta
10 a.m.-6:15 p.m., Talaadada
8 a.m.-11:15 a.m., Arbacada
8 a.m.-4:15 p.m., Khamiista/Jamcada

**Xarunta Caafimaadka Bukaan Socodka Dhalinta ah** oo furan maalinkasta oo Talaado ah 3-6 p.m. ogolaanshaha waalidka looma baahna.

## BARNAAMIJKA FAYADHAWRKA DHALINTA ▲ ■ ●
Wuxuu hormariyaa fayaqabka dhalinta ayadoo la adeegsanaayo barnaamijyada dhalinta iyo iskaashi lalasamaynaayo ururada deegaanka, lasiinaayo baaritaanada STI iyo HIV ga laguna bixinaayo Dugsiyada Magaalada Columbus, wuxuuna barnaamijku qabtaa Isbahaysiga Bartamaha Ohio ee Caafimaadka Galmada.
**Taleefanka:** 614-645-7368
**Saacadaha:** 8 a.m.-5 p.m., Isniinta-Jamcada

---

Adeegyada Turjumaada Luuqada ayaa laga heli karaa dhamaan adeegyada caafimaadka. Utag Waaxda Caafimaadka si laguu caawiyo.

Saacadaha shaqadu way isbadali karaan. Fadlan horay usiiwac. Waxaa laxirayaa markay jiraan fasaxyada iyo taariikhaha kale ladoorto. **Ladaabacay 2/2018**


THE CITY OF COLUMBUS
ANDREW J. GINTHER, MAYOR
COLUMBUS PUBLIC HEALTH

240 Parsons Ave., Columbus
Taleefanka: 614-645-7417
Fax: 614-645-7633
E-mail: health@columbus.gov
Adeegyada Magaalada: 614-645-3111
www.publichealth.columbus.gov


▲ Adeegyada Caruurta ♥ Adeegyada haweenka ○ Adegyada duqowda ● Adeegyada Qorshaynta bulshada ■ Adeegyada cafimaadka/latalinta ☰ Adeegyada maamulka ■ Adeegyada shatiyaynta/duljoogtaynta

THE CITY OF COLUMBUS
ANDREW J. GINTHER, MAYOR
COLUMBUS PUBLIC HEALTH

# KAYDKA MACLUUMAADKA EE ADEEGYADEENA



www.publichealth.columbus.gov

## HELITAANKA DAYREELKA ▣
Caawimaada shaqsiga ah ee diiwaangalinada caymiska caafimaadka haayadaha Medicaid iyo Health Insurance Marketplace (Suuqa Caymiska Caafimaadka).
**Taleefanka:** 614-645-1244
**Saacadaha:** 8:30 a.m.-5 p.m., Isniin-Jamce

## AALKOLADA IYO ADEEGYADA DAAWADA ▲ ○ ▣
Waxay bixisaa adeegyada kahortaga ee dhalinta iyo dadka waawayn iyo adeegyada daawaynta bukaan socodka ee kusalaysan jinsiga qofka (ayna kujiraan MAT oo lasamaynaayo bisha Juun 2018) ee dadka waawayn. Baaritaanada caadiga ah ayaa lasamaynayaa Isniinta, Talaadada iyo Khamiista. Waqtiyada adeegga lafulinaayo waxay kuxirantahay barnaamijka. Nasoo wac si aad uhesho macluumaadka barnaamijka.
**Taleefanka:** Adeegyada Daawaynta: 614-645-6839
Adeegyada Kahortaga ah: 614-724-2024
Adeegyada Yaraynta Waxyeelada: 614-724-2033
**Saacadaha Xafiiska:** 8 a.m.-6:30 p.m., Isniinta-Khamiista
8 a.m.-5 p.m., Jamcada

## QANIINYADA XAYAWAANKA, XAKAMAYNTA XAYAWAANADA HALISTA AH IYO RAABIYADA ■ ▣
Waxay kajawaabtaa cabashooyinka laxariira qaniinyada xayawaanka, waxay bixisaa ruqsadaha beerashada xayawaanka, waxay macluumaad kabixisaa xayawaanada iyo caafimaadka dadwaynaha.
**Taleefanka:** 614-645-6134
**Saacadha:** 7:45 a.m.-4:45 p.m., Isniinta/Talaadada/ Khamiista/Jamcada
10 a.m.-4:45 p.m., Arbacada

## ADEEGGA HOOYADA IYO ILMAHA KCAAGAN TUBAAKADA ▣
Waxay bixisaa talooyin shaqsi ah oo laxariira joojinta sigaarka oo lasiiyo hooyooyinka uurka leh waxaynay siisaa taageero, waxbrasho iyo talobixin intay uurka leeyihiin iyo markay dhalaan. Diiwaangalinta iyo kulanada balanta dhakhtarka.
**Taleefanka:** 614-645-2135
**Saacadaha:** 8:30 a.m.-5 p.m., Isniin-Jamce

## SHAHAADOOYINKA DHALASHADA IYO DHIMASHADA (Tirakoob Muhiim ah) ☰
Waxay laantaani bixisaa nuqulada rasmiga ah ee shahaadooyinka dhalashada iyo dhimashada ee Degmada Franklin; $25 oo qarash ah ayaa lagaa qaadayaa. wixii macluumaad ah booqo www.publichealth.columbus.gov.
**Taleefanka:** 614-645-7331
**Saacadha:** 8 a.m.-4:15 p.m., Isniinta/Talaadada/ Khamiista/Jamcada
9 a.m.-4:15 p.m., Arbacada
*Adeegyada bukaan socodka, ila maalmaha adeegga, Isniinta-Jamcada; waxaana laxirayaa xarunta 4 p.m.*

## SHATIYAYNA FARSHAXANKA JIRKA ■
Waxay kormeertaa ayna shatiyada siisaa xarumaha qurxinta.
**Taleefanka:** 614-645-7005
**Saacadha:** 7:45 a.m.-4:45 p.m., Isniinta/Talaadada/ Khamiista/Jamcada
10 a.m.-4:45 p.m., Arbacada

## KHATARAHA DHANKA JIRKA IYO KIIMIKADA ● ■
Waxay baaritaan kusamaysaa ayna talooyin kabixisaa arimaha khatarta ah ee wasaqda ah, waxayna udiyaar garoowdaa ayna kafalcelisaa xaaladaha degdeg ah ee kiimikada laxariira.
**Taleefanka:** 614-645-7005
**Saacadha:** 7:45 a.m.-4:45 p.m., Isniinta/Talaadada/ Khamiista/Jamcada
10 a.m.-4:45 p.m., Arbacada

## KAHORTAGA DHAAWACA ILMAHA ▲ ○ ●
Waxay macluumaad iyo adeegyo kabixisaa kahortaga dhaawaca ilmaha, hubinta suumanka amaanka ee gaariga, waxayna bixisaa kuraasta gawaarida oo raqiis ah.
**Taleefanka:** 614-645-6138
614-645-7748 (barnaamijka kursida gaarida)
**Saacadaha:** 8 a.m.-5 p.m., Isniinta-Jamcada

## COLUMBUS METROPOLITAN SYSTEMKA KAFALCELINTA ARIMAHA CAAFIMAADKA (CMMRS) ●
Waxay qorshaysaa xaaladaha caafimaad ee degdega ah ee laxariira kiimikada, sunta, aaladaha raajada, nukleerka iyo dhacdooyinka qaraxyada.
**Taleefanka:** 614-645-6736 ama 614-645-7089
**Saacadaha:** 8 a.m.-5 p.m., Isniinta-Jamcada

## COMMUNITY RIGHT-TO-KNOW HOTLINE (LAYNKA MACLUUMAADKA SIIYA BULSHADA) ●
Waxaa lagu kormeeraa macluumaadna looga bixiyaa kiimikooyinka la isticmaalay ama lagu kaydiyay gudaha Columbus/Franklin County.
**Taleefanka:** 614-645-6275
**Saacadha:** 7:45 a.m.-4:45 p.m., Isniinta-Jamcada

## CREATING HEALTHY COMMUNITIES(ABUURISTA BULSHOYIN CAAFIMAAD QABA) ▲ ○ ●
Waxay kalashaqaysaa iskaashatada bulshada kahortaga xanuunada xunxun ayadoo lahormarinaayo lana taageeraayo nashaadaadka jirka, helitaanka nafaqada/cuntada iyo kahortaga isticmaalka tubaakada.
**Taleefanka:** 614-645-3173
**Saacadaha:** 8 a.m.-5 p.m., Isniinta-Jamcada

## CAAFIMAADKA ILKAHA ▲ ○ ▣
Adeeggaan wuxuu bixiyaa adeegyada caafimaadka ilkaha oo aasaasiga ah, ayna kujiraan baaritaano, raajada, nadiifinta, buuxinta, bixinta (siibida ilkaha), dayactirada qaar kamid ah gawsaha iyo miciyada. Xaaladaha degdega ee bukaan socodka (saacado kaladuwan).
**Taleefanka:** 614-645-7487
**Saacadaha:** 8 a.m.-4 p.m., Isniinta-Jamcada
*(waxaa laxiraa maalinkasta inta udhaxaysa 12-1 p.m.)*

## BARNAAMIJKA CAAFIMAADKA DHUUJINTA ILKAHA ▲ ▣
Wuxuu adeegyada dhuujinta/xajinta ilkaha (ningaxa caaga ah) ee gawsaha qaangaarka ah usameeyaa ardayda dhigata fasalada 2aad iyo 6aad ee dhigta dugsiyada Columbus. Wax qarash ah lama qaadaayo, shirkadaha caymiska qaarkood ayaa lacag laga dalban kara.
**Taleefanka:** 614-645-6853
**Saacadaha:** 8 a.m.-3:30 p.m., Isniinta-Jamcada

## UDIYAAR GAROOWGA XAALADAHA DEGDEGA AH ●
Waxay xoojisaa awooda ay Columbus ugu diyaar garoobayso ugana jawaabayso xaaladaha degdega ah ayadoo lashaqaynaysa wakaaladaha kale, abuuraysa fulinaysana qorshayaasha xaaladaha degdeg ah, la soconaysa xanuunada, tababaraysa shaqaalaha gurmadka shacabkana warbixino siinaysa.
**Taleefanka:** 614-645-7089
**Saacadha:** 8 a.m.-5 p.m., Isniinta-Jamcada

## EPIDEMIOLOGY (DARAASADA MASIIBOOYINKA) ●
Waxay aruurisaa, qiimaysaa ayna fasirtaa macluumaadka qiimaynada caafimaadka bulshada iyo qorshaynta barnaamijka iyo indhoindhaynta, waxay samaysaa lasocoshada xannada iyo baaritaanada cudurada dilaaca, waxayna gurmad kafidisaa khataraha dhanka caafimaadka ah ee bulshada haysta.
**Taleefanka:** 614-645-6252
**Saacadaha:** 8 a.m.-5 p.m., Isniinta-Jamcada

## ILAALINTA BII'ADA ●
Adeeggan wuxuu bixiyaa macluumaad iyo adeegyo kuwaasoo abuuro lagu dhawraayo bii'ada iyo fayadhawrka caafimaad ee bulshada.
**Taleefanka:** 614-645-6189
**Saacadaha:** 7:45 a.m.-4:45 p.m., Isniinta/Talaadada/ Khamiista/Jamcada
10 a.m.-4:45 p.m., Arbacada

## DIFAACA CUNTADA SHATIYAYNTA ■
Waxay shati siisaa ayna duljoogto kusamaysaa hawlaha adeegyada cuntada iyo ganacsiyada cuntada tafaariiqda ah gada, waxayna tababaro cilmi kororsi ah siisaa shaqaalaha cuntooyinka kashaqeeya.
**Taleefanka:** 614-645-7005
**Saacadaha:** 7:45 a.m.-4:45 p.m., Isniinta/Talaadada/ Khamiista/Jamcada
10 a.m.-4:45 p.m., Arbacada

## SOOSHEEGIDA CUNTOOYINKA XANUUNKA KEENI KARA ▲ ○ ■
Waxay baaritan kusamaysaa cabashooyinka bulshada kayimaada ee laxariira cuntooyinka xanuunka laga qaado.
**Taleefanka:** 614-645-1791
**Saacadha:** 7:45 a.m.-4:45 p.m., Isniin-Jamce

## CARUUR CAAFIMAAD QABTA, CAAFIMAADKA CAYILKA ▲ ●
Waxay kalashaqaysaa xarumaha deegaanka ee daryeelka caruurta iyo iskaashatada kahortaga cayilka badan ayadoo kor looqaadaayo tayada cuntooyinka iyo nashaadaadka jirdhiska ee caruurta da'doodu tahay 0-5 sanadood.
**Taleefanka:** 614-645-1224
**Saacadha:** 8:30 a.m.-5 p.m., Isniin-Jamce

## GURYO CAAFIMAAD QABA ▲ ▣
Waxay talooyin taleefanka loomarsiinaayo kasiisaa khataraha guryaha kajiri kara iyo caawimaad ay kasiiso qoysaska sunta macdanka ee caruurta halista ku ah.
**Taleefanka:** 614-724-6000
**Saacadaha:** 7:45 a.m.-4:45 p.m., Isniinta/Talaadada/ Khamiista/Jamcada
10 a.m.-4:45 p.m., Arbacada

## XAAFADO CAAFIMAAD QABA ▲ ○ ●
Waxay dhistaa nolol caafimaad leh ayadoo dadka loofuraayo macluumaadka caafimaadka, laqabanaayo munaasabado kusaabsan fayadhawrka bulshada, wacyi galinta bulshada, iyo gudigga bulshado horseedka uthay ee kataliso bixinta caafimaadka oo lasamaynaayo. Saacadha shaqada way kakaduwanaan karaan.
**Taleefanka:** 614-645-0732
**Saacadha:** 8 a.m.-5 p.m., Isniinta-Jamcada

## DEEGAANO CAAFIMAAD QABA ▲ ○ ●
Waxay kor uqaadaa nolosha firfircoon ayadoo abuuraysa goobo dadku nashaadaad kusameeyaan maalinkasta oo noloshooda kamid ah, ayna kujiraan goobo lagu socdo, qorshaynta magaalada iyo jidadka amaanka ah ee dugsiga loomaro.
**Taleefanka:** 614-645-5318
**Saacadaha:** 8 a.m.-5 p.m., Isniinta-Jamcada

## DUGSIYO CAAFIMAAD QABA ■
Waxay kormeer kusamaysaa dugsiyada dawlada iyo kuwa gaarka looleeyahayba si loo ilaalsho caafimaadka iyo fayadhawrka caruurta ayadoo laga hortagaayo khataraha.
**Taleefanka:** 614-645-7005
**Saacadha:** 7:45 a.m.-4:45 p.m., Isniinta/Talaadada/ Khamiista/Jamcada
10 a.m.-4:45 p.m., Arbacada

## CAGAARSHOOWGA C - KUXIRADA DARYEELKA ○ ●
Waxay dabagal kusamaysaa natiijooyinka dadka laga helo cudurka Cagaarshowga C waxay shaqsiyaadkaas usii gudbisaa baaritaano dheeraad ah, wacyi galin, daryeel caafimaad, gaadiid lagu qaado, caymis iyo adeegyo kale oo taageero ah ayay siisaa bukaankaas.
**Taleefanka:** 614-645-DARYEELKA (2273)
**Saacadha:** 8 a.m.-4:30 p.m., Isniinta-Jamcada

## ADEEGYADA BULSHADA ☰
Waxay bixisaa shaqalaysiin wanaagsan, iskuxrka shaqaalaha iyo maaraynta waxsoosaarka dadka.
**Taleefanka:** 614-645-6238
**Saacadha:** 7 a.m.-4 p.m., Isniinta-Jamcada
*Laynka Adeegyada Shaqada ee Rayidka 645-7667 (24-saac, Isniinta-Jamcada)*

## ADEEGYADA TALAALKA ▲ ○ ▣
Waxay samaysaa talaal iyo waxbarasho loo sameeyo caruurta iyo dadka waawayn. Mashruuca L.O.V.E wuxuu diirada saaraa iskuxirka iyo abuurida wada shaqaynta bulshada.
**Taleefanka:** 614-645-7945
614-645-7597 (Perintal Hepatitis B PreventionKahortaga Degdega ah ee Cagaarshowga B)
614-645-7559 (Mashruuca L.O.V.E.)
**Saacadaha Xarunta Caafimaadka Furantahay:** 8 a.m.-2:15 p.m., Isniinta
10 a.m.-6:15 p.m., Talaadada (waxaa laxirayaa 2-3 p.m.)
8-11:15 a.m., Arbacada
8 a.m.-4:15 p.m., Khamiista/Jamcada (waxaa laxirayaa 12-1 p.m.)
*Xarunta caafimaadku waxay joojin kartaa qaabilaada bukaanka haday xili hore buuxsanto.*
**Saacadaha ay Shaqayso Xarunta caafimaadka ee Worthington (600 High St., Worthington):**
1-4 p.m., Talaadada 3aad bilkasta

## JIIFKA AMAANKA AH EE ILMAHA HADA DHASHAY ▲ ○ ●
Waxay samaysaa adeegyada jiifka amaanka ah iyo wacyi galinta laxariirta ilmaha yaryar si looyareeyo dhimashooyinka ilmaha dhawaan dhashay kuyimaada.
**Taleefanka:** 614-645-1762 (si ad macluumaadka barnaamijka uhesho)
614-645-3111 (si laguu siiyo sariiraha laqaadan karo; meesha adeegyadu joogtada yihiin)
**Saacadaha:** 7:30 a.m.-4 p.m., Isniinta-Jamcada

## BAARITAANKA XANUUNTADA INFAKSHINKA KADILAACA ▲ ○ ●
Waxay baaritaan kusamaysaa kiisaska lasoo sheegay ee xanuunada faafa; kormeer ayay kusamaysaa xanuunada bulshada kadhex jira, waxay kahortagtaa faafida xanuunka.
**Taleefanka:** 614-645-1474 *ama* 645-7417 (wicitaanka xaaladaha degdega ah)
**Saacadaha:** 8 a.m.-5 p.m., Isniinta-Jamcada

## NIDAAMKA SOOSHEEGA XANUUNADA INFAKSHANKA KADHASHA ●
Waxay soosheegtaa xanuunada faafa ayadoo ugudbisa waaxda caafimaadka deegaanka
ee deegaanka si fudud oo tayo leh. Kaliya loogu talagalay dhakhaatiirta daryeelka
caafimaadka iyo shaybaarada.
**Taleefanka:** 614-525-8888 (24-hour) / www.idrsinfo.org
**Fax:** 614-525-8890

## ADEEGGA GURIGA EE CAAFIMAADKA HOOYADA IYO DHALAANKA ♥
Waxay bixisaa iskuxirka daryeel lacag la'aan ah, oo qoyska loogu adeegaayo ayna bixinayaan xubno diiwaangashan oo kalkaalisooyin ah, shaqaalaha bulshada iyo shaqaalaha iskuxirka bulshada si kor loogu qaado caafimaadka hooyoyinka, dhalaanka iyo qoysaska. Adeegyada waxaa diirada lagu saarayaa kordhinta helitaanka qoyska ee daryeelka caafimaadka iyo adeegyada bulshada, in layareeyo caruurta dhimanaysa wacyi galina lasameeyo.
**Taleefanka:** 614-724-BABY (2229)
**Saacadaha:** 8 a.m.-5 p.m., Isniinta-Jamcada

## CAAFIMAADKA DADKA LAGA BADANYAHAY ○ ●
Waxay hogaamin caafimaad usamaysaa baahiyaha dadka isisr ahaan iyo qowmiyad ahaan laga tirada badanyahay ayadoo wacyi galin iyo iskuxir usamaysa, kalana shaqaysa bulshada arimo caafimaad oo kaladuwan.
**Taleefanka:** 614-645-7335
**Saacadaha:** 8 a.m.-5 p.m., Isniinta-Jamcada

## SHAQADA BULSHADA XAAFADA ○ ▣
Waxay dadka deegaanka kuxirtaa adeegyada bulshada, wacyi galinta caafimaadka iyo baaritanada kajira Xarumaha Caafimaadka ee Xaafada iyo goobaha kale ee bulshada.
**Taleefanka:** 614-645-6807 (Laynka Caawimaada ee Shaqada Bulshada)
**Saacadaha:** 8 a.m.-4 p.m., Isniinta-Jamcada

▲ Adeegyada Caruurta ♥ Adeegyada haweenka ○ Adegyada duqowda ● Adeegyada Qorshaynta bulshada ▣ Adeegyada cafimaadka/latalinta ☰ Adeegyada maamulka ■ Adeegyada shatiyaynta/duljoogtaynta